



Seattle  
Public  
Utilities

# Barnaamijka Gelidda Idan-la'aanta

Seattle Public Utilities (SPU) ayaa mas'uul ka ah bixinta biyaha aas-aasigaa ee la cabbo, bulaacadaha iyo biyaha wasakhda ah, iyo adeegyada qashinka adag ee dadweynaha. Si loo bixiyo adeegyadaan oo aan u hoggaansanno qawaaniinta, shaqaalaheennu waxay u baahan yihiin inay si badbaado leh u galaan goobaheenna si ay u dayactiraan oo ay ugu shaqeeyaan nidaamyadeena iyo kaabayaasha, sida tuubooyinka, saldhigyada bamka, iyo kaydadka. Barnaamijka Gelidda Idan-la'aanta ah ee SPU wuxuu naga caawiyaa hubinta gelitaankaan badbaadada leh ee shaqaalaheena.

## Waa maxay Barnaamijka Gelidda Idan-la'aanta?

Gelidda Idan-la'aanta ah waa isticmaalka gaarka ah oo sharci-darro ah ee dhulka danta guud. Gelidda Idan-la'aanta ah waxaa badanaa loo arkaa qaab dhismeed, sida xayndaab ama qayb ka mid ah dhismaha, laakiin wixii siyaadin ah ama dhaqdhaqaq ah oo aan la oggolaan oo lagu sameeyo dhulalka dadweynaha ayaa sidoo kale loo qaadan karaa gelidda lian-la'aanta ah.

Gelidda Idan-la'aanta ah ee suurtagalka ah waxaa ka mid noqon kara, laakiin kuma koobna:

- Ku rakibida tiirarka deyrarka, barxadaha, iyo sagxadaha
- Geedo abuur iyo beero
- Darbiyada Haynta
- Dhismayaal / waxyaalo qaab-dhismeedyo leh
- Balliyada Haysashada
- Barkadaha dabaasha
- Qalabka garoonka ciyaarta
- Isbeddellada kor-u-qaadista am sagxadaha kala-sarreeya
- Kaydinta qalabka ama baabuurta la dhigto



*Shaqaalaha SPU waxay u baahan yihiin inay si badbaado leh u galaan kaabayaasheena si loo xaqiijiyo adeegyada muhiimka u ah dadweynaha.*

## Waa maxay Barnaamijka Gelidda Idan-la'aanta ah ee SPU?

Gelidtaannada Idan-la'aanta ah waxay wax u dhimaan awoodeena aan ku ilaalinayno kaabayaasheena. Barnaamijka Gelidda Idan-la'aanta ah ee SPU wuxuu waajibiyaa in dhammaan gelidtaannada laga saaro meesha ama si rasmi ah loogu oggolaado heshiis sharci ah. Marka SPU ay aqoonsato gelidtaanno idan-la'aan ah ee dhulka danta guud iyada oo loo marayo Barnaamijka Gelidda Idan-la'aanta , waxaan la xiriirnaa milkiiliyaasha hantida wixii ku saabsan ka saarista ama ogolaanshaha alaabta ama hawlahaa gelidda. Si aad wax badan uga ogaato Barnaamijka Gelidda Idan-la'aanta ah ee SPU iyo xeerarka gelidda idan-la'aanta ah, iskaan-garee QR-ka ama booqo bog-khadkeena: [www.seattle.gov/utilities/your-services/real-property-services](http://www.seattle.gov/utilities/your-services/real-property-services).



Su'aalo? La xiriir:

Shannon Bartlett | Sr. Wakiilka Hantida Maguurtada ah | Shannon.Bartlett@seattle.gov |  
206-684-8250

Seattle  
Public  
Utilities